

# ISLAH MOVEMENT IN SOMALIA



# حركة الإصلاح في الصومال

Ref:.....

Date:08/06/2013

رقم:.....

تاريخ:.....

## Canbaaraynta ka qaybgalka Madaxweyne Xasan Sheekh ee is-caleemasaarka Siisii

Shacabka Soomaaliyeed waa shacab jecel xorriyadda, isla markaana neceb dulmiga, kalitaliska, xukunmaroorsiga iyo in dhiig loo daadiyo kursi dartiis. Shacabka Soomaaliyeed iyo shacabka Masar waa laba shacab oo walaalo ah, lehna xiriir qotodheer oo taariikhi ah kuna dhisan iskaashi iyo isu-hiillin.

Hadaba, Xarakada Islaax ee Soomaaliya waxa ay canbaaraynaysaa kaqaybgalka aan laga fiirsan ee Madaxweyne Xasan Sheekh uu kaga qaybgalay is-caleemasaarka Cabdulfataax Siisii, oo talada Masar kula wareegay afganbi iyo xasuuqa kumanaan qof.

In Madaxweyne Xasan Sheekh uu ka qaybgalo is-caleemasaar dhiiggu ka da'ayo waa Shahaadazuur aan la aqbali Karin in madaxwaynaha Soomaaliyeed oo huwan sharafta umadda soomaaliyeed inuu ka qaybgalo, waana arrin ka soo horjeeda mabadiida iyo danaha Umadda Soomaaliyeed.

Haddaba, Ururka Islaax wuxuu booqashadan ayaanka daran uga cudurdaaranayaa Shacabka Masar ee aan walaalaha nahay, shucuubta muslimiinta, iyo dhammaanba umadaha xorta ah ee jecel cadaaladda.

Wabilaahi Towfiiq



Dr. Cali-baashi Cumar Roorayee  
Gudoomiyaha Xarakada Islaax